

# DEEQDA WAXBARASHADA HORE WADADA I

## Ka Codso Khadka Tooska ah!

Ka codso si aad u aragto haddii qoyskaagu u qalmo lacag si ay uga caawiso bixinta barnaamijka waxbarashada hore ee ilmahaaga.

Si aad khadka tooska ah uga codsato, iskaanka QR koodka ama u gudub [earlylearningscholarshipshub.mn.gov](http://earlylearningscholarshipshub.mn.gov), kadibna:



1. Samee koonto
2. Geli macluumaadka adiga kugu saabsan iyo ilmaha ama carruurta aad rabto inaad u codsato, oo raac tillaabooyinka loo baahan yahay
3. Gudbi codsiga

**Haddii aad horey u haysato deeq waxbarasho, la xiriir Maamulahaaga Aagga si aad u hesho tilmaamo.**

### Su'aalaha iyo Taageerada

Su'aalaha taageerada farsamada, ama si aad u baartid Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo, u gudub tabta "Taageerada" ee bogga Deeqda Waxbarashada Hore. Si aad uga hesho caawimaad barnaamij u qalma ama macluumaad guud, wac 888.291.9811.

### Ku Saabsan Deeqaha Wadada I

Waxaa si toos ah loo siiyaa qoysaska buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka.

Lacagaha deeqda waxaa lagu bixiyaa barnaamijka waxbarashada hore ee qoyska doortaan.

Qoysasku waxay sanad walba cusboonaysiin karaan deeqda marka la gaaro 1 July ilaa ilmaha uu da'diisu gaaro heerka loo oggol yahay dugsiga hoose.

Deeqaha waxbarashadu waxay "raacaan ilmaha" barnaamij kasta oo ka qayb qaata Parent Aware isla markaana aqbala Deeqaha Waxbarashada Hore.

Lacagaha deeqda waxaa lagu salaynayaa qiimaynta Parent Aware, juqraafiga iyo nooca barnaamijka aad doorato.